WASAARADDA QORSHEYNTA MAALGASHIGA & HORUMARINTA DHAQAALAHA

وزارة التخطيط والاستثمار والتنمية الاقتصادية

MINISTRY OF PLANNING, INVESTMENT AND ECONOMIC DEVELOPMENT

# WARBIXINTA BILLAHA

## SEBTEEMBAR 2025



## HORDHAC

Sebteembar 2025 waxay ahayd bil ay Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha muujisay door hoggaamineed ee dhinaca fulinta Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025–2029) iyo xoojinta iskaashiga ku dhisan xog iyo isla-xisaabtan. Intii lagu guda jiray bishan, Wasaaraddu waxay hoggaamisay shirar heer qaran iyo caalami ah, iyadoo xoogga saartay mideynta dadaallada bah-wadaagta horumarineed iyo in la waafajiyo taageerada caalamiga ah ee mudnaanta qaranka. Waxaa ka mid ahaa: Shirarkii Tiirarka NTP ee Muqdisho, ka-qaybgalka Madasha Iskaashiga Horumarineed ee Busan 2025 ee Seoul, aas-aaska Ururka Qiimaynta Soomaaliyeed (SOMES), iyo xoojinta iskaashiga lala yeeshay Qaramada Midoobay iyo la-hawlgalayaasha kale. Hawlahani waxay muujinayaan horumarka Soomaaliya ee dhinacyada dowlad-wanaagga, kobaca dhaqaalaha waara, horumarinta karaanka aadanaha, iyo adkaysiga cimilada, iyadoo la hubinayo in horumarka dalka uu ku dhisan yahay wada-tashi iyo isla-xisaabtan.

# FARRIINTA WASIIRKA



*Sebteembar 2025 waxay wasaaraddu ku tallaabsatay guulo waaweyn oo dhinaca Qorshaha isbeddelka qaranka iyo horumarinta dhaqaalaha iyo nidaamyada kormeerka iyo qiimeynta. Ka-qaybgalka Madasha Iskaashiga Horumarineed ee Busan waxay muujisay baahida loo qabo in la helo iskaashi wax-ku-ool ah, kana tarjumaya baahiyaha iyo mudnaanta qarankeena. Dhanka gudaha, guulaha ay ka mid yihiin Shirarkii Tiirarka NTP iyo aas-aaska Ururka Qiimaynta Soomaaliya (SOMES) waxay caddaynayaan sida ay nooga go'an tahay qorsheynta hufan, ka-qaybgalka bulshada iyo dhisidda hannaan isla-xisaabtan xooggan. Tallaabooyinkan waxay dib u xaqiijinayaan aragtideenna ah in horumarka Soomaaliya uu noqdo mid ku dhisan xog lagu kalsoonaan karo, iskaashi loo dhan yahay iyo hoggaamin qaran. Bisha soo socota iyo wixii ka dambeeya, waxaan sii xoojin doonaa iskaashiga si aan u xaqiijinno in horumarku uu keeno natiijooyin la taaban karo oo faa'iido u leh shacabka Soomaaliyeed, lana dhiso mustaqbal adkaysi leh oo barwaaqo ah.*

***Mudane Maxamuud C. Sheekh Faarax (Beenebeene)***
*Wasiirka Qorsheynta, Maalgashiga & Horumarinta Dhaqaalaha*

## SOOMAALIYA OO KA QEYB GASHAY SHIR CAALAMI AH OO LOOGA HADLAYO WAXTARKA HORUMARINTA IYO ISKAASHIGA CAALAMIGA AH




**30-ka September 2025** - Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha, Mudane Maxamed Shire ayaa ka qeybgalay Madasha Iskaashiga Horumarineed ee Busan 2025, oo ka socota magaalada Seoul, Jamhuuriyadda Kuuriya.

Mudane Shire wuxuu ka mid ahaa ka-qaybgalayaasha dood heer sare ah oo looga hadlay waxtarka horumarinta (Development Effectiveness), xilli ay hoos u sii dhacayaan deeqaha horumarineed ee caalamiga ah (ODA).

Agaasimaha Guud wuxuu khudbaddiisa ku xusay: Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025–2029) iyo Aragtida Qaranka 2060 oo ah jihada horumarineed ee Soomaaliya iyo Tusaalooyin muujinaya sida Qaab-dhismeedka Iskaashiga Deeqaha Soomaaliya (Somali Aid Architecture) uu u fududeeyo wada-shaqeynta dowladda, bahwadaagta horumarineed iyo bulshada si loo helo natiijooyin muuqda.

Mudane Shire wuxuu carrabka ku adkeeyay in loo baahan yahay iskaashi wax-ku-ool ah oo ku salaysan xog lagu kalsoonaan karo, si loo xaqiijiyo horumar waara xilli ay yaraanayaan deeqaha horumarineed.

"Waxaan rabnaa in iskaashiga caalamiga ah uu noqdo mid waxtar leh oo si cad ula jaanqaada baahiyaha iyo mudnaanta qarankeena. Soomaaliya waa inay si buuxda u hoggaamisaa qorshaheeda horumarineed, iyadoo adeegsanaysa xog iyo wada-shaqeyn loo dhan yahay," ayuu yiri Agaasimaha Guud, Mudane Maxamed Shire.

Shirweynaha Busan 2025 wuxuu fursad siinayaa dalalka soo koraya inay is-weydaarsadaan waayo-aragnimadooda, ayna xoojiyaan iskaashiga horumarineed iyo awoodda hay'adaha qaran si loo gaaro natiijooyin waara.

## WASAARADDA QORSHAYNTA IYO QARAMADA MIDOOBAY OO ISKA KAASHANAYA DARDARGELINTA KORMEERKA IYO QIIMEYNTA DALKA



**30-ka September 2025** - Waaxda Kormeerka iyo Qiimaynta ee Wasaaradda Qorshaynta, Maalgashiga, iyo Horumarinta Dhaqaalaha ayaa kulan muhiim ah la yeelatay Xafiiska Ku-xigeenka Wakiilka Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay iyo Isku-duwaha Howlaha Bani'aadantinimo ee Soomaaliya (UNRCO).

Kulanka ayaa diiradda lagu saaray: xoojinta iskaashiga Dowladda iyo QM, dhammaystirka qaab-dhismeedka Kormeerka, Qiimaynta, iyo Barashada (MEL), qaban-qaabada Shirka 2-aad ee Kormeerka iyo Qiimaynta, dhismaha Ururka Qiimaynta Soomaaliya, iyo diyaarinta Qorshaha Hawleedka 2026.
Labada dhinac ayaa ku heshiiyay in la dardar-geliyo wada-shaqeynta oo in dhammaan taageerada QM ay si buuxda ula jaan-qaadato Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP).

## DARDARGELINTA FULINTA QORSHAHA ISBEDDELKA QARANKA (NTP)



**29-ka September 2025** - Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ayaa magaalada Muqdisho ku qabatay kulan wadatashi oo ku saabsan dardargelinta fulinta Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP) ee sannadka 2026 iyo xoojinta qorsheynta wadajirka ah ee Dowladda Federaalka iyo bah-wadaagta horumarinta caalamiga ah.

Kulanka waxaa furay Kusimaha Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorsheynta Qaranka, Mudane Cabdinaasir Cumar Kaatib, waxaana ka soo qayb galay mas'uuliyiin ka kala socday hay'adaha Dowladda Federaalka Soomaaliya.

Intii uu socday kulanka ayaa lagu soo bandhigay tiirarka Qorshaha Isbeddelka Qaranka iyo bartilmaameedyadooda horumarineed.
Shirkan ayaa muhiim u ah xoojinta iskaashiga Dowladda Federaalka iyo bah-wadaagta horumarinta si loo dardar-geliyo yoolalka horumarineed ee Soomaaliya.

## KULAN HORUDHAC U AH AAS-AASKA URURKA QIIMAYNTA SOOMAALIYA (SOMES)



**28 Sebteembar 2025 –** Wasiir-ku-xigeenka Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha, Mudane Maxamed Aadan Maxamed ayaa guddoomiyay kulan horudhac ah oo lagu aasaasayo Ururka Qiimaynta Soomaaliya (SOMES).

Kulankan ayaa diiradda lagu saaray doorka SOMES ee kor u qaadista hufnaanta qorshaynta qaranka, qiimaynta barnaamijyada dowladdu fuliso, iyo hubinta in siyaasadaha iyo mashaariicda horumarineed lagu saleeyo xog iyo qiimeyn lagu kalsoonaan karo.

Wasiir-ku-xigeenku wuxuu carrabka ku adkeeyay sida ay Wasaaraddu uga go'an tahay taageeridda ururkan, isagoo ku tilmaamay "madal muhiim u ah dowladnimada, isla-xisaabtanka, iyo dib-u-dhiska Soomaaliya."

Kulanka waxaa ka qayb galay wakiillo ka socday Rugta Ganacsiga, Bulshada Rayidka ah, Jaamacadaha, iyo Xafiiska Isku-xirka Hay'adaha Caalamiga ah, taas oo muujinaysa baahida loo qabo iskaashi ballaaran oo lagu horumarinayo nidaamyada qiimaynta ee dalka.

## WADATASHIGA IYO AQOON-IS-WEYDAARSI KU SAABSAN SIDII GANACSIYADA AAN RASMIGA AHAYN LOOGA DHIGI LAHAA KUWO RASMI AH



**27-ka September 2025 -** Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha, gaar ahaan Waaxda Horumarinta Dhaqaalaha, ayaa magaalada Muqdisho ku qabatay kulanka wadatashiga iyo aqoon-is-weydaarsiga ee lagu falanqeeyay sidii ganacsiyada aan rasmiga ahayn ee Soomaaliya looga dhigi lahaa kuwo rasmi ah.

Kulanka, oo uu si rasmi ah u furay Agaasimaha Guud ee Wasaaradda, Mudane Maxamed Shire, ayaa waxaa kasoo qeyb galay hay'adaha dowladda iyo wakiillo ka socday ganacsiyada gaarka loo leeyahay. Waxaa lagu soo bandhigay xogaha ku saabsan ganacsiyada aan rasmiga ahayn, caqabadaha hortaagan iyo fursadaha lagu xoojin karo.

Agaasimaha Waaxda Horumarinta Dhaqaalaha, Mudane Cabdinaasir Cumar Kaatib, ayaa carrabka ku adkeeyay muhiimadda ay leedahay in ganacsiyada gaarka loo leeyahay ay noqdaan kuwo rasmi ah, isagoo soo bandhigay qorshaha dowladda ee fududeynaya diiwaan gelintooda iyo horumarinta taageerada ganacsatada.

Agaasimaha Guud, Mudane Maxamed Shire, ayaa ku nuux-nuuxsaday in loo baahan yahay tallaabooyin qaran si loo yareeyo tirada ganacsiyada aan diiwaan gashneyn, loona xaqiijiyo xogaha dhaqaale ee lagama maarmaanka u ah horumarinta shaqo-abuurka, karraanka bulshada, helitaanka amaahda iyo dhisidda kaabayaasha dhaqaalaha.

## AGAASIMAHA GUUD OO LA KULMAY KU-XIGEENKA AGAASIMAHA GOBOLKA CARABTA EE UNFPA



**25-ka Sebtember 2025 –** Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha, Mudane Maxamed Shire, ayaa kulan la qaatay wafdi ka socday Hey'adda Qaramada Midoobay ee Dadweynaha (UNFPA) oo uu hoggaaminayay Mudane Dominic Allen, Ku-xigeenka Agaasimaha Gobolka Carabta.

Kulanka ayaa diiradda lagu saaray xoojinta iskaashiga iyo sidii barnaamijyada UNFPA loo waafajin lahaa Qorshaha Isbeddelka Qaranka (2025–2029), kaas oo qeexaya mudnaanta horumarineed ee Soomaaliya shanta sano ee soo socota.

Agaasimaha Guud ee Wasaaradda ayaa uga mahadceliyay UNFPA taageerada joogtada ah ee ay siiso Wasaaradda iyo hay'adaha kale ee dowladda, isaga oo xusay muhiimadda ay leedahay iskaashiga istaraatiijiga ah ee lagu gaari karo himilooyinka horumarineed ee qaranka.

## WAAXDA ISKU-DUWIDDA DEEQAHA IYO XAFIISKA ISKU-DUWAHA QARAMADA MIDOOBAY EE SOOMAALIYA OO KULMAY



**24-ka September 2025 –** Waaxda Isku-duwidda Deeqaha ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ayaa xarunta wasaaradda ee Muqdisho kulan kula yeelatay saraakiil ka socday Xafiiska Isku-duwaha Qaramada Midoobay ee Soomaaliya (RCO).

Kulanka ayaa diiradda lagu saaray Xoojinta kulamada Hannaanka Wada-shaqeynta Tiirarka Qorshaha Isbeddelka Qaranka, Sare u qaadista isla-xisaabtanka Dowladda iyo Qaramada Midoobay iyo U diyaargarowga Madasha Iskaashiga Horumarineed (DCF).
Kulankani wuxuu qeyb ka yahay dadaallada lagu xoojinayo iskaashiga horumarineed si loo xaqiijiyo guulaha Qorshaha Isbeddelka Qaranka (2025–2029).

# WASAARADDA QORSHEYNTA OO SOO BANDHIGTAY GUULIHII SADDEXDII SANO EE XUKUUMADDA DANQARAN



**18 Sebteembar 2025** – Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ayaa ka qeyb gashay bandhigga lagu soo bandhigayay guulaha Xukuumadda DanQaran ee saddexdii sano ee la soo dhaafay.

Madaxweynaha Jamhuuriyadda, Ra'iisul Wasaaraha, Ra'iisul Wasaare Ku-xigeenka iyo madaxda kale ee qaranka ayaa booqday bandhigga, halka Wasiirka Qorsheynta, Mudane Maxamuud C. Sheekh Faarax (Beenebeene), uu soo bandhigay horumarka ay Wasaaraddu ka gaartay qorsheynta qaranka, dhiirrigelinta maalgashiga, iyo nidaamyada casriga ah ee kormeerka iyo qiimeynta.

Bandhiggan ayaa muujiyay sida Wasaaraddu uga go'an tahay hoggaaminta qorsheynta istaraatiijiga ah iyo dhisidda hannaanno casri ah oo kor u qaada isla-xisaabtanka iyo horumarka waara ee dalka.

# SHIRKII HANNAANKA WADA-SHAQEYNTA TIIRARKA QORSHAHA ISBEDDELKA QARANKA OO LAGU SOO GABAGABEEYAY MUQDISHO



**15–18 Sebteembar 2025** – Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha (WQM&HDH) ayaa 15–18 Sebteembar 2025 ku qabatay Muqdisho Shirka Hannaanka Wada-shaqeynta Tiirarka Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025–2029). Shirkan afar maalmood socday ayaa xoojinayay iskaashiga dowladda, deeq-bixiyeyaasha, Qaramada Midoobay, ganacsatada iyo bulshada rayidka, si loo mideeyo dadaallada lagu gaarsiinayo mudnaanta Qorshaha Isbeddelka Qaranka.

Maalinta 1-aad: Waxaa la daah-furay shirkan, iyadoo la falanqeeyay Tiirka Dowlad Wanaaga, lana adkeeyay muhiimadda dib-u-eegista dastuurka, dhismaha nidaamka federaalka, sareynta sharciga, dib-u-heshiisiinta, iyo xoojinta ka-qaybgalka bulshada.

Maalinta 2-aad: Waxaa diiradda lagu saaray Tiirka Dhaqaalaha Waara, iyadoo laga hadlay sugnaanta cuntada, kaabayaasha dhaqaalaha, shaqo-abuurka, kobcinta dakhliga gudaha, iyo maalgashiga kaabayaasha adkaysiga cimilada.

Maalinta 3-aad: Waxaa la qabtay kulanka Tiirka Arrimaha Bulshada iyo Karaanka Aadamiga, kaas oo xoogga lagu saaray waxbarashada loo dhan yahay, adeegyada caafimaadka, helitaanka biyo nadiif ah, qorsheynta magaalooyinka, iyo taageeridda dhalinyarada, haweenka, dadka naafada ah iyo barakacayaasha.

Maalinta 4-aad: Shirku wuxuu kusoo idlaaday Tiirka Deegaanka iyo U-Adkaysiga Cimilada, iyadoo la falanqeeyay soo-celinta dhulka nabaad-guuray, xoojinta xarumaha maareynta degdegga ee dowlad-goboleedyada, u-diyaargarowga Shirka Cimilada (COP30), iyo dhisidda adkaysiga bulshooyinka xeebaha iyo kuwa nugul.

Shirku waxa uu xaqiijiyay ballanqaadka dowladda Soomaaliya ee dhisidda hannaan isku-dhafan oo kor u qaada dowlad wanaag, horumar dhaqaale, adeegyo bulsho iyo adkaysi cimiladeed, si loo gaaro mustaqbal waara oo loo dhan yahay.

## WASIIRKA QORSHEYNTA IYO MADAXA UN WOMEN OO KA WADA-HADLAY XOOJINTA ISKAASHIGA IYO HORUMARINTA HAWEENKA



**9-ka Sebtember 2025** - Wasiirka Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha, Mudane Maxamuud C. Sheekh Faarax (Beenebeene) ayaa kulan muhiim ah la yeeshay Dr. Rukaya Mohammed, Madaxa UN Women ee Soomaaliya.

Kulanka waxaa lagu falanqeeyay xoojinta iskaashiga Wasaaradda iyo UN Women ee hirgelinta Qorshaha Isbeddelka Qaran (2025–2029). Labada dhinac waxay isku raaceen in barnaamijyada UN Women la waafajiyo qorshaha qaranka, la xoojiyo wada-shaqeynta kormeerka iyo qiimeynta (M&E), isla markaana Wasaaradda Qorsheynta iyo UN Women ay si wadajir ah uga shaqeeyaan ururinta iyo la-falgalka xogaha ku saabsan haweenka, si loo hubiyo oo loo cabbiro horumarka dumarka Soomaaliyeed.

## SHIRKII HORUDHACA EE HANNAANKA WADA-SHAQEYNTA TIIRARKA QORSHAHA ISBEDDELKA QARAN OO LAGU SOO GABAGABEEYAY MUQDISHO




**3-daSebteembar 2025 –** Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha, gaar ahaan Waaxda Isku-duwidda Deeqaha, ayaa soo gabagabeeysay Shirka Horudhaca ee Hannaanka Wada-shaqeynta Tiirarka Qorshaha Isbeddelka Qaran (NTP 2025–2029), kaas oo socday 31 Ogosto – 3 Sebteembar 2025.

Shirka, oo uu furay Agaasimaha Guud Mudane Maxamed Shire, ayaa ahaa madal muhiim ah oo lagu mideeyay dowladda, bah-wadaagta caalamiga ah, ganacsatada iyo bulshada rayidka, si loo isku waafajiyo Qorshaha Isbeddelka Qaran iyo Qaab-dhismeedka Iskaashiga Qaramada Midoobay (UNCF 2026–2030), loona dejiyo ajandaha rasmiga ah ee shirweynaha tiirarka ee la qaban doono bartamaha Sebteembar.

Shirka ayaa socday afar maalmood, iyadoo maalin kasta diiradda lagu saaray tiir gaar ah oo muhiim u ah Qorshaha Isbeddelka Qaranka:

Maalinta 1-aad: Waxaa lagu falanqeeyay Tiirka Dowlad Wanaaga, iyadoo laga dooday horumarka laga gaaray yoolalka 2025, meelaha u baahan maalgelin iyo waafajinta UNCF 2026–2030.

**Maalinta 2-aad:** Waxaa lagu diiradda saaray Tiirka Isbeddelka Dhaqaalaha Waara, iyadoo la eegi jiray horumarka, caqabadaha, iyo fursadaha lagu dardar-gelinayo koboca dhaqaale ee waara.

**Maalinta 3-aad:** Kulanka waxaa lagu gorfeyay Tiirka Arrimaha Bulshada iyo Karaanka Aadamiga, iyadoo lagu qiimeeyay helitaanka adeegyada bulshada ee asaasiga ah, sida waxbarashada, caafimaadka, biyaha, iyo taageeridda dhalinyarada, haweenka, dadka naafada ah, iyo barakacayaasha.

**Maalinta 4-aad:** Shirku wuxuu ku soo dhammaaday Tiirka Deegaanka iyo U-adkeysiga Cimilada, iyadoo laga dooday soo celinta dhulka nabaad-guuray, dhisidda adkaysiga bulshada nugul, iyo diyaarinta ajandaha Soomaaliya ee shirweynaha cimilada (COP30).

Shirka ayaa mar kale xaqiijiyay muhiimadda wada-shaqeynta dhammaan bah-wadaagta horumarka, si loo hirgeliyo Qorshaha Isbeddelka Qaran ee 2025–2029, iyadoo la dhisayo hannaan mideysan oo wax-ku-ool ah oo ka jawaaba baahiyaha dowlad wanaag, horumar dhaqaale, adeegyada bulshada, iyo adkaysiga cimiladeed.


WASAARADDA QORSHEYNTA
وزارة التخطيط
MINISTRY OF PLANNING



MoPIED